sug mudadii aad qabi jirtay dhiiga caadada, ka dibna ka mayro

Caa'isha oo mu'uminiinta hooyadood ahayd Allaha ka raali ahaadee- waxay tiri: Umu xabiiba Bintu Jaxash oo ahayd xaaskii Cabdiraxmaan Binu Cowf ayaa Rasuulka Ilaahay scw - uga soo cabatay dhiig-ku batay, wuxuuna ku yiri: "sug mudadii aad qabi jirtay dhiiga caadada, ka dibna ka mayro". waxayna ahayd mid qubaysata salaad walba.
[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Dumarkii saxaabiyada ahaa mid ka mida ayaa uga cabatay Nabiga-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- dhiig si joogto ah uga socda, wuxuu ku amray inay salaada joojiso mudadii uu hayn jiray xaydkeedu intaanu ku iman arinkan cusub ee dheeriga ahi, ka dibna ay ka qubaysato oo tukato, waxay suno ahaan u qubaysan jirtay salaad walba.

http://sunnah.global/hadeeth/so/show/10015